

☑ La Socoshada Tallaadada COVID-19

CDC waxay ku talisay in dadka la socdaan tallaaladooda COVID-19, oo ay ku jiraan garoojooyinka dheeraadka ah oo shaqsiyaadka aan difaaca liito ama garoojooyinka xoojiyaha oo baraha waqtiga caadiga ah. Shaqsiyaadka si dhexaad ah ama daran u liito difaaca waa inay helaan cirbad koowaad oo dheeraad iyo cirbada xoojiyaha.

Yaa u qalma tallaalada COVID-19?

Dhammaan shaqsiyaadka da'da 5 sanno iyo ka weyn way u qalmaan inay helaan taxanaha koowaad ee tallaalka COVID-19 ee Mareykanka. Intaas waxaa dheer, dhammaan shaqsiyaadka si dhexaad ah ama daran u liito difaaca oo 5 sanno jir ah iyo ka weyn way u qalmaan inay qaataan dheeraadka garoojo (3^{aad}) ee tallaalka COVID-19 iyo taxanahooda koowaad.

Ka bilow Janaayo 5, 2021, dhammaan shaqsiyaadka 12 sanno jirka iyo ka weyn kaas oo dhameystiray taxanahooda koowaad ee tallaalka COVID-19 way u qalmaan garoojada xoojiyaha markii ay gaaraan waqtiga hakad ku tiirsanaanta ee taxanaha koowaad ee ay qaateen.

Tallaaladee COVID-19 ayaa lagu talliyay?

CDC waxay ku talineysaa in dhammaan shaqsiyaadka helaan taxaaha koowaad iyo garoojada xoojiyaha ee mRNA (Pfizer ama Moderna) ee tallaalka COVID-19. Shaqsiyaadka 18 sanno jirka ah iyo ka weyn ee qaatay garoojada koowaad ee Janssen (Johnson & Johnson) ayaa loogu talliyay inay qaataan garoojada xoojiyaha oo tallaalka mRNA labo bilood ee xigta garoohadooda koowaad.

Fadlan la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaad si aad u go'aansatid tallaalkee COVID-19 ee adiga kuugu haboon.

Yaa loo tixgeliyay inuu difaaca liito?

Dadka waxaa loo tixgeliyay inay si dhexaad ama daran difaaca u liito haddii ay qabaan:

- Ay qaadanayeen daaweynta kansarka firfircoon oo burooyinka ama kansarada dhiiga
- Qaateen xubin beeris oo ay qaadanayaan daawo cadaadisoo difaaca jirka
- Qaateen xubin beerista unuga oo labadii sanno ee la soo dhaafay gudahood ama ay qaadanayaan daawooyin cadaadisoo difaaca jirka
- Difaac la'aanta daran ama dhexaadka ah (sida xaaladaha DiGeorge, xaalada Wiskott-Aldrich)
- Caabuqa HIV ga hormarsan ama aan la daaweyn
- Daaweynta firfircoon ee leh garoojada sareysa ee corticosteroids ama kaniiniyo kale ee cadaadin karo jawaabta difaacaaga

Dadka waa inay kala hadlaan bixiyahooda daryeelka caafimaadka xaalada caafimaadkooda iyo haddii qaadashada cirbada koowaad ee dheeraadka ah ay ku haboontahay.

La Socoshada: Carruurta Da'da 5-11 sanno jirka

Taxanaha Koowaad:

Dhammaan carruurta da'aha 5-11 way u qalmaan taxanaha labada garoojo ee tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 oo u dhaxeeyso 21 maalmood. Intaas waxaa dheer, dhammaan carruurta da'dooda ah 5-11 sanno jir oo si dhexaad ah ama daran difaaca u liito ayaa u qalmo dheeraadka garoojada (3^{aad}) iyo taxanahooda koowaad oo u dhaxeeyso 28 maalmood garoojadooda labaad kadib.

Garoojada Xoojiyaha:

Carruurta da'dooda ah 5-11 sanno jirka hadeer uma qalmaan garoojada xoojiyaha COVID-19.

La Socoshada: Qaangaarada da'da 12-17 sanno jir

Taxanaha Koowaad:

Dhammaan qaangaarada da'aha 12-17 sanno jirka way u qalmaan taxanaha labada garoojo ee tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 oo u dhaxeeyso 21 maalmood. Intaas waxaa dheer, dhammaan carruurta da'da 12-17 sanno jirka oo si dhexaad ah ama daran difaaca u liito ayaa u qalmo dheeraadka garoojada (3^{aad}) iyo taxanahooda koowaad oo u dhaxeeyso 28 maalmood garoojadooda labaad kadib.

Garoojada Xoojiyaha:

Qaangaarada da'da 12-17 sanno jirka, oo ay ku jiraan kuwa difaaca liito, way u qalmaan garoojada xoojiyaha Pfizer COVID-19 shan bilood kadib markii ay dhameystiraan taxanahooda koowaad.

La Socoshada: Dadka weyn ee da'da 18+ sanno jirka ee kuwa qaatay Taxanaha Koowaad ee Pfizer

Taxanaha Koowaad:

Dhammaan dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn way u qalmaan taxanaha labada garoojo ee tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 oo u dhaxeeyso 21 maalmood. Intaas waxaa dheer, dhammaan dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn oo si dhexaad ah ama daran difaaca u liito ayaa u qalmo dheeraadka garoojada (3^{aad}) iyo taxanahooda koowaad oo u dhaxeeyso 28 maalmood garoojadooda labaad kadib.

Garoojada Xoojiyaha:

Dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn, oo ay ku jiraan kuwa difaaca liito, way u qalmaan garoojada* xoojiyaha COVID-19 shan bilood kadib markii ay dhameystiraan taxanahooda koowaad.

*Inkastoo tallaalka mRNA la doorbido, tallaalka Johnson & Johnson COVID-19 [ayaa la tixgelin karaa xaaladaha qaar.](#)

La Socoshada: Dadka weyn ee da'da 18+ sanno jirka ee kuwa qaatay Taxanaha Koowaad ee Moderna

Taxanaha Koowaad:

Dhammaan dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn way u qalmaan taxanaha labada garoojo ee tallaalka Moderna COVID-19 oo u dhaxeeyso 28 maalmood. Intaas waxaa dheer, dhammaan dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn oo si dhexaad ah ama daran difaaca u liito ayaa u qalmo dheeraadka garoojada (3^{aad}) iyo taxanahooda koowaad oo u dhaxeeyso 28 maalmood garoojadooda labaad kadib.

Garoojada Xoojiyaha:

Dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn, oo ay ku jiraan kuwa difaaca liito, way u qalmaan garoojada* xoojiyaha COVID-19 shan bilood kadib markii ay dhameystiraan taxanahooda koowaad.

*Inkastoo tallaalkada mRNA la doorbido, tallaalka Johnson & Johnson COVID-19 [ayaa la tixgelin karaa xaaladaha qaar.](#)

La Socoshada: Dadka weyn ee da'da 18+ sanno jirka ee kuwa qaatay Taxanaha Koowaad ee Johnson & Johnson

Garoojada Koowaad:

Dhammaan dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn way u qalmaan taxanaha koowaad ee halka garooja ah ee Johnson & Johnson* ee tallaalka COVID-19. Dadka weyn ee 18 sanno jirka iyo ka weyn oo sida dhexaadka ama daran difaaca u liito ee qaatay garoojada koowaad ee Johnson & Johnson UMA qalmo dheeraadka garoojada (2^{aad}).

Garoojada Xoojiyaha:

Dadka weyn ee da'da 18 sanno jirka iyo ka weyn, oo ay ku jiraan kuwa difaaca liito, way u qalmaan garoojada* xoojiyaha COVID-19 labo bilood kadib markii ay dhameystiraan garoojada koowaad.

*Inkastoo tallaalkada mRNA la doorbido, tallaalka Johnson & Johnson COVID-19 [ayaa la tixgelin karaa xaaladaha qaar.](#)

Meesha Laga Qaato Tallaalka

Warbixinta la xiriirto bixiyayaasha tallaalka COVID-19 iyo rugaha caafimaadka kuu dhow waxaa laga heli karaa bogga NDDoH [Raadiyaha Tallaalka COVID](#). Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa caawin Qadka NDDoH ee 1.866.207.2880.